



Aaway bulaacad-mareenkayga gaarka ah?

“Bulaacada-mareenka gaarka ah” waa tuubooyinka sida gaarka ah loo leeyahay oo biyaha wasakhda ka soo qaada jikooyinka iyo musqulaha guryaha kuna shuba bulaacad-mareenka wayn ee dadweynaha. Hadii aad adiga leedahay gurigaaga ama dhismahaaga, waxaad leedahay bulaacad-mareenkaaga gaarka ah ilaa inta ay la xiriirayso bulaacad-mareenka weyn ee dadweynaha.



Bulaacad-mareen kaaga gaarka ah waxay kugu keeni karaan dhibaatooyin caafimaad adiga iyo qoyskaaga.

Bulaacadaha waxaa ku jira jeermis iyo fayrasyo khatar ku keeni kara caafimaadkaaga iyo midka qoyskaaga. Bulaacad-mareenada gaarka ah oo si fiican u shaqeeya (oo aan lahayn dildillacyo ama meelo xiran) micneheedu waa in wasakhda aysan dibada tuubada ku daadan. Dhibaatooyinka bulaacad-mareenada gaarka ah waxaa keeni kara:



Saliida cunno karinta iyo dufanka oo ku bata gudaha tuubooyinka.



Geedaha iyo xididaha geedaha oo ku dhex beerma dildillacyada – gaar ahaan tuubooyinka sanado badan aan la bedelin.



Qashin qubka, sida qashinka musqulaha la soo raaciyoo ama walxaha aan dabiiciga ahayn, waxay xirayaan tuubooyinka .



Da'da weyn – Dumitaanka, kala goysyada oo isdaba mara, ama qalabka qadiimiga ah dhamaan waxay keeni karaan dhibaatooyinka la xiriira bulaacad-mareenada gaarka ah.

Kaydso ilaa \$5,000 marka bulaacad-mareenkaaga gaarka ah lagu hagaajiyo:

- ✓ Ka goynta tuubooyinka saqafka ama godadka biya mareenka ee bulaacad-mareen kaaga gaarka ah
- ✓ Hagaajinta tuubooyinka bulaacad-mareenkaaga gaarka ah ee doldoollada leh
- ✓ Xirida goobaha bannaan ee bulaacad-mareenkaaga

Hadii aad tahay macmiilka degmadaha bulaacad-mareenada Midway ama Lakehaven, ka codso qiimo-dhimistaada halkan www.kingcounty.gov/picrebates
Wixii su'aalo ah la xiriir picrebates@kingcounty.gov

gaarka ah